Toronto Community Housing

Buug-gacmeedka Kiraystaha

Guri fiican. Beel fiican.

Tenant Handbook, December, 2006 - Somali

Cidda aay tahay in la waco:

Kaalmo deg-deg ah wac 911

- Haddii dab ama qaac uu ka jiro dhismahaaga dhexdiisa
- Haddii dambi uu dhacayo
- Haddii uu qof uu si khatar ah u jiran yahay ama u dhaawacan yahay
- Haddii alaarmiga sheega kaarboon moonoksaaydh (CO) uu dhawaaqo

Haddii aadan ku hadal INGIRIIS

- U sheeg howlwadeenka deg-degga ah afka aad ku hadashid.
- Howl-wadeen deg-deg ah oo ku hadla afkaas ayaa ku caawini doona.

Wac 416-981-5500

- Haddii aqalkaga uusan lahayn kuleyl, koronto ama biyo
- Haddii uu aqalka kaa xirmo
- Si aad u soo sheegto biyo dayn, daad ama musqul xirantay
- Si aad u weydiisato dayactir
- Si aad ula xiriirto shaqaalaha
- Si aad u weydiiso su'aal, ugu hambalyeyso qof ama cabasho u sameyso

Taleefankan wuu furan yahay habeen iyo maalin, todobada maalmood ee usbuuca.

Dadka aad la xiriireyso dhismahaaga

Xafiiska Unugga Guriyeynta Beesha

_____

Maamulaha Guriyeynta Beesha

_____

Sarkaalka Horumarinta Caafimaadka

_____

Isu-duwaha Adeegyada Beesha

_____

Madaxa-dhismaha Mashruuca

_____

Wakiilka Kiraystaha

_____

Waxaa daabacay Guriyeynta Beesha Toronto, Disembar 2006.

Guri fiican. Beel fiican.

Adiga, iyo in ka badan 164,000 oo kiraystayaal kale ah oo ku nool Guriyeynta Beesha Toronto, waxaad ka tihiin xubno beelaha guriyeynta ugu weyn adduunka uguna dhaqdhaqaaq nolol wanaagsan. Waxaa jira waayeel iyo dhalinyaro, waalidiin iyo caruur, iyo dad awoodo kala duwan leh, oo ku hadla in ka badan 70 af.

Buug-gacmeedkan waxaa ka buuxa war ku saabsan gurigaaga iyo beeshaada. Wuxuu bixinayaa war waxqabad sida, sida loo bixiyo kirada, sida loo sameeyo dayactirada iyo sida loo sameeyo dib u meerteynta. Wuxuu kaloo muujinayaa sida aad ugala shaqeyn kartid deriskaaga iyo shaqaalaha Guriyeynta Beesha Toronto dhisidda beel aad ku raaxeysan kartid kuna faani kartid.

Kirayste walba wuxuu gacan ka geysan karaa nolosha iyo guusha gurigiisa, dhismahiisa iyo jaarkiisa. Waxaan rajeynayaa inaan idinkala shaqeeyo dhamaantiin si aan uga dhigno Guriyeynta Beesha Toronto meel aad u fiican oo lagu noolaado.

Derek Ballantyne
Sarkaalka Sare ee Fulinta

Tusmada Buugga

Sida Guriyeynta Beesha Toronto u Shaqeyso 5

Kiradaada 6
Bixinta kiradaada, haddii aadan bixin karin kiradaada,
kirada dakhliga-lala-socodsiiyey, kirada suuqa

Aqalkaaga 8
Qalabka guryaha, baalkoonada, khadka telefishanka, lacagaha
la-isku-dalaco, qurxinta, qashinka, qorshe-cagaaran, wasakhda
khatarta ah, kululeynta iyo korontada, ceymiska, xayawaanka
waxyeelada leh, dayactirada, baraf qaadidda, xanaaneynta
beerta-guriga

Dhismahaaga 14
Adeegyada beesha, qolka dhardhaqidda, meelaha baabuurta
la dhigto, qolal la kireeyo

Amaankaaga 15
Amaanka dabka, qaaca iyo qalabka sheega CO, amaanka beesha,
amaanka shaqsiga, sheegidda dambiyada

Ku howlanaanta…….. 17
Sida uu u shaqeeyo habka ka qeybgalka kiraystaha, habka
loogu howlanaado

Xuquudaada iyo Waajibaadyadaada. 20
Guri-ka-saaridda, waxa laga filayo shaqaalaha, xuquuqda
aadanaha, waxa shaqsiga u gaarka ah, deris wanaagga,
u wariijinta aqal kale, dhamaan waa in la wada geli karaa,
beelo lagu wada jiro

Guuridda 24

Sida Guriyeynta Beesha Toronto u Shaqeyso

Guriyeynta Beesha Toronto (TCHC) waa mulkiilaha ugu weyn ee guryo bulshadeed – waxay guri u tahay in ka badan 164,000 oo kirayste.

Waxaan ka kooban nahay beelo lagu magacaabo Unugyada Guriyeynta Beesha ama “CHU-yo”. Mid walba wuxuu leeyahay Maamulaha Unugga Guriyeynta Beesha (CHU-ga). Dhismayaasha qaar waxaa toos u maamula shaqaalaha Guriyeynta Beesha Toronto. Kuwo kalena, waxaa qandaraas ku heysta shaqaale maamul hanti oo u maamula TCHC. Shaqaalaha TCHC iyo shaqaalaha shirkadda maamulka hantida labadaba waxay u warbixiyaan Maamulaha CHU-ga, labadabana waxay bixiyaan adeegyo isku mid ah.

Magacyada Shaqaalaha Dhismaha waxay ku yaalaan dhismahaaga gudihiisa.

- Shaqaalaha dhismaha waxaa ku jira Madaxa-dhismaha Mashruuca, Nadiifiyaha, Shaqaale howlgacmeed ama Qofka Dayactirka Nadaafadda Guud. Shaqaalahan waxay wax ka qabtaan nadaafadda, dayactirada iyo codsiyada kiraystayaasha badankood. Saacadahooda waxay ku dhegan yihiin albaabka xafiiska.
- Isku-duwayaasha Adeegyada Kiraystaha (TSC-yada) ayaa ka jawaabi kara su’aalahaada ku saabsan heshiiskaada kirada (lease), xisaabtaada kirada, kabka kirada ama u wareejinta meel kale. Waxay joogaan xafiiskaada CHU-ga.
- Sarkaalada Horumarinta Caafimaadka (HPO-yada) waxay kala shaqeeyaan kiraystayaasha, shaqaalaha, hey’adaha beesha sameynta beelo caafimaad qaba. Waxay kuu qabanqaabin karaan turjumid af iyo qoraal ah, waxay kuu qaban karaan shirar iyo dhacdooyin, waxayna kuu heli karaan inaad hesho adeegyada beeshaada dhexdeeda ah.

Guriyeynta Beesha Toronto

- Waxay guri u tahay 164,000 kirayste – qiyaastii boqolkiiba lix dadweynaha Toronto. Kiraystayaasha waxay ku hadlaan in ka badan 70 af.
- 58,500 aqal
- In ka badan 1,500 shaqaale
- Shirkad guriyeyn oo aan faa’iido doon ahayn oo aay leedahay Magaalada Toronto
- Dakhligeena bar wuxuu ka yimaadaa kirada iyo lacagaha kale ee lagu dalaco kiraystaha. Barka kale wuxuu ka yimaadaa lacagaha dowladda federaaliga ah iyo dowladda magaalada.

Kiradaada (Ijaarkaaga)

Bixinta kiradaada

Kiradaada waxaa lagaa rabaa maalinta koowaad ee bil walba.

Bixinta Hore-loo-ansixiyey (PAP)
Waxaad ku bixin kartaa kirada PAP ama bangigaaga. Kama bixin kartid kiradaada dhismahaaga ama xafiiska CHUga.

Kiraystayaasha badankood waxay isticmaalaan PAP – habka Bixinta Hore-loo-ansixiyey. Waxaad ka heli kartaa foomka PAP Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha ee xafiiskaaga CHUga. PAP:

- Waa fududahay isticmaalkeeda. Bangigaaga si toos ah ayuu bilwalba uga bixinayaa kiradaada xisaabtaada bangiga
- Waqti ayuu leeyahay – haddii xitaa aad jiran tahay ama maqan tahay
- Waa howl-fududeyn. Haddii kiradaada aay isbedesho, shaqaalaha ayaa kuu soo diraya ogeysiis. Bangigaaga si toos ayuu cadadka saxda ah ugu bedelayaa PAP-gaada.

Ka-bixinta Bangiga
Waxaad kaloo ka bixin kartaa kiradaada bangiga, credit unionka, shirkadaha “trust” ama shirkadaha sarifa jeegagga ee degaankaaga. Si aad taas u sameysid:

- Ka qaado warqadaha lacag bixinta Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha.
- Isticmaal warqadda lacag bixinta si aad ugu bixiso lacag cadaan ah, jeeg, money order ama makiinadda bangiga.

Kala xiriir bangiga, si aad ugu bixisid internet ama taleefan.

Haddii aadan bixin karin kirada
Waxaan dooneynaa inaad heysato aqalkaaga! Haddii aad dhibaato ka qabto bixinta kiradaada, isla markiiba la xiriir Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha. Haddii aad ku jirto dhib xoog leh waxaan kuu qabanqaabin doonaa qorshe lacag bixin oo kuu shaqeeya. Waxaan kaloo kula xiriirin karnaa adeegyo kaa caawinaya maamulidda lacagahaaga.

Kirada-dakhliga-lala-socodsiiyey (RGI)
Kiraystayaasha qaar waxay bixiyaan kirada-dakhliga-lala-socodsiiyey, ama RGI. Deganayaashan waxaa laga kabaa qiyaastii boqolkiiba 30 ee dakhliga reerka oo dhan marka la isku wadageeyo wixii ka badan. Taas macnaheedu waa:

- Kiradaada ma hoos imaneyso kirada la xadeeyey.
- Marka dakhligaaga uu kor ama hoos u dhaco, kiradaadana weey isbedeleysaa. Haddii dakhligaaga uu sare u kaco, kiradaada sare ayeey u kaceysaa 60-90 maalmood gudahood maalinta uu dakhligaaga isbedelo. Haddii dakhligaaga uu hoos u dhaco, kiradaada waxay hoos u dhaceysaa bisha ku xigta.
- Guud ahaan, reeraha dakhligooda uu isku mid yahay waxay bixin doonaan kiro isku mid ah, ha deganaadaan abaartamento, guryo-taxan (townhouse) ama aqal caadi ahba.

Soo gudbinta isbedelada dakhligaaga ama reerkaaga

Dowladda Ontario ayaa sameeysa xeerarka kabka dhaqaale ee RGI. **Si aad u heysato kab dhaqaale, waa inaad:**

- Soo sheegtaa wixii isbedel ah ee dakhli (koror iyo hoos u dhac) isla markiiba. **Ha sugin ilaa laga gaaro dib-u-eegidda kirada sannadlaha ah.** Haddii aadan soo gudbin isbedelada, kororka kiradaada waxaa laga soo bilaabi doonaa taariikh hore.
- Soo sheeg isbedelka ku yimaada reerkaaga isla markiiba – ilmo cusub, arday ka soo noqday kulliyad ama jaamacad, marti muddo dheer ah, ama qof kasta oo ku soo biira ama ka taga reerka.
- U gudbi isbedelada Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha.

Dib-u-eegidda Sannadlaha

Sannad walba, waxaad heli doontaa xirmo dib-u-eegidda. Waxaan ku weydiisan doonaa inaad xaqiijiso dakhliga iyo hantida qof walba ee joogaya gurigaaga. Fadlan u dir warkan Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha 30 maalmood gudahood.

Kirada suuqa

Kirooyinkan waxay la mid yihiin kuwa aay ku dalacaan dadka mulkiilayaasha shaqsiga ah.

Kirooyinka suuqa weey isbedeli karaan sannadkiiba hal mar si aay uga muuqato kharashyada dhismahaaga ama isbedelada nadaamka. Waxaad heli doontaa ogeysiis 90 maalmood ah maalinta ugu horeysa bisha haddii kiradaada aay isbedeleyso. Kirooyinka Guriyeynta Beesha Toronto, sida dhamaan guriyeynta aan faa'iido doonka ahayn, ma hoos imanayaan xadeynta kirada.

Kiraystayaasha bixinaya kirada suuqa waxay dalban karaan kabka dhaqaalaha Dakhliga-lala-socodsiiyey-kirada (RGI)
Laakiin waa inaad ku biirtaa liiska sugitaanka ee magaalada oo dhan ah oo laga yaabo inaad sugto sannado badan. Waxaad foomka codsiga ka heli kartaa Xafiiska CHU-ga ama Housing Connections ka wac 416-981-6111. Haddii aad u qalantid, waxaad ku biiri doontaa liiska sugitaanka iyadoo lagu saleynayo taariikhdii ugu horeysay ee aad codsatay Guriyeynta Beesha Toronto.

Gurigaaga

Qalabka guriga

Aqal walba wuxuu leeyahay qaboojiye iyo cunto kariye. Waxay sida ugu fiican u shaqeeyaan haddii aad joogto u nadiifiso. Haddii aad khasaare gaarsiiso qaboojiyahaaga ama cunto kariyahaaga, waxaad bixin doontaa lacagta dayactirka. Haddii aad ku nooshahay guri caadi ah ama guryaha-taxan, weydii Madaxaaga-dhismaha Mashruuca in laguu ogol yahay makiinadda dhardhaqidda iyo tan weelka-dhaqdo. Guryahan caadiga ah iyo kuwa-taxan qaarkood, qalabkan guryaha waa loo ogol yahay. Laakiin, marka hore weydiiso. La hadal Shaqaalaha Dhismaha inta aadan ku xirin qaboojiyaha hawada (air-condition). Shaqaalaha waxay u baahan yihiin in aay hubiyaan fiilooyinka in aay amaan yihiin oo qalabkana si amaan ah loogu rakibay oo uusan soo dhicin. Si aad u dhaqaaleyso tamar eeg qiyaasta Energy Star inta aadan iibsan ka hor; waxaad ka heleysaa warqadda ku dhegan qaboojiyaha hawada. Dabool wixii hawo ah oo ka baxaya ama soo gelaya qaboojiyaha hareerahiisa. Jiilaalka, qaboojiyaha ka saar daaqadda.

Baalkoonada

Haddii aad leedahay baalkoon, ku raaxeyso hawada cusub!

Xusuuso:

- Kaarbet ha dhigin baalkoonka. Kaarbetyada qoyan waxay khasaaro u geystaan shubka.
- Baalkoonka ha u isticmaalin maqaasiin ahaan.
- Baalkoonada looma ogola in hilib lagu dubo (BBQ). Khatar dab ayeey leedahay jaarkana weey dhibsadaan.
- Ilaali caruurta yar-yar iyo xayawaanka guri joogta ah marka aay joogaan baalkoonka.

Khadka Telefishanka

Khadka telefishanka kuma jiro kiradaada.

Khadka telefishanka waxaa laga iibsan karaa Rogers dhamaan dhismayaasha, iyo Bell ExpressVu dhismayaasha qaarkood. Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha ayaa kuu sheegi kara adeegyada khadka telefishanka ee laga heli karo dhismahaada.

Kuma xiri kartid saxan satalaayt ah dhismaha adigoo aan marka hore ka hubinin Madaxa-dhismaha.

Lacagaha la-isku-dalaco

Mar walba soo sheeg dhibaatooyinka isla markiiba.

Dayactirada caadiga ah waxba laguguma soo dalacayo. Laakiin, waa lagugu soo dalici **karaa** khasaaraha haddii:

- Qoyskaaga, martidaada ama xayawaankaaga aay khasaaro u geystaan meelaha dadka ka dhaxeeya
- Dayactirada ku yimaadaan inaadan xanaaneyn ku haboon ku sameyn aqalkaaga darteed. Tan laga yaabee in aay ku jirto shaqooyinka deg-degga ah. Tusaale, laga yaabee inaad bixiso khasaaraha biyaha ee ka yimaada tubo biyo deeysay oo aadan soo sheegin.
- Lumisid furayaashaada ama *fob-yada*
- Aad weydiisid adeeg waqtiga shaqada ka dib ah oo ah shaqo aan deg-deg ahayn
- Aqalkaaga uu ku jiro xaalad aad u xun (oo ka baxsan gaboobidda caadiga ah) marka aad ka guureyso

Qurxinta

Ku raaxeyso inaad ka dhigto gurigaaga mid qurxoon oo raaxo leh.

Laakiin, xusuuso:

- Bedelaad waarta lama ogola. Tusaale, ha bedelin dhulka ama ha ka saarin albaabada ama qalabka ku rakiban guriga.
- Isticmaal aalada la suro sawirada oo xabageysan ama lagu dhejin karo gidaarada. **Ha isticmaalin masaabiir iyo biro-qaloocan sababtoo ah gidaarka ayeey khasaaro waarta u geystaan.**
- Isticmaal sharooto laba dhinacle ah haddii aad kaarbet dhigeysid.
- Ha isticmaalin masaabiir, bir ama koolo.
- Isticmaal warqadaha gidaarka oo “qalalan lana fujin karo” oo aan khasaaro u geysaneyn gidaarada marka la fujinayo.
- Ka hubi Shaqaalaha Dhismaha haddii aad su’aal qabtid.

Qashinka

Dhismayaasha dhaadheer

- Dhamaan wixii dib-loo-meerteynayo – warqad, dhalooyin, gasacado, weelalka iyo daboolada cuntada ee caagga ah – keen weelka dib-u-meerteynta ee dhismahaaga.
- Qashinka caadiga ah wuxuu raacayaa dhuunta. Si looga hortago xirmid:
    - Qashinka oo dhan ku xir bacyo yar yar.
    - laba bac geli qashinka bisadda iyo daayabarada caruurta.
    - Ha ku ridin dhalo, gasacyada hawada-cadaadisaan ku jirto (aerosol) ama sheeyo waaweyn dhuunta qashinka.
- Weydii Shaqaalaha Dhismaha, sida loo tuuro alaabta iyo sheeyada waaweyn.

Guryaha caadiga ah, guryaha taxan iyo dhismayaasha yar-yar qaarkood

- Dhamaan wixii dib-loo-meerteynayo tanaga meerteynta ee kuugu dhow ku rid. Weydii Shaqaalahaaga Dhismaha haddii aadan hubin waxa la meerteyn karo.
- Qashinka ku rid bacyo si amaan ah loo xiray oo ku rid tanaga qashinka ku haboon. Sheeyada waaweyn waa in la geeyaa meelaha ku haboon.

Haddii Magaalada aay qashinka toos uga qaadeyso gurigaaga, wixii dib-loo-meerteynayo, qashin, wasaqda jardiinka iyo wixii orgaanik ah gee waddada dhinaceeda maalinta la qaadayo habeenka ka horeeya. Tanagyada ka qaad isla marka qashinka laga qaado, oo ku xaree beerta gadaale, qeybta hoose ee guriga ama meel kale oo ku haboon.

Qorshe-cagaaran

Iyadoo leh 164,000 kirayste, Guriyeynta Beesha Toronto waxay saameyn xoogan ku leedahay deegaanka magaaladeena. Waxaan isticmaalnaa in ka badan $100 malyan oo tamar iyo biyo ah sannad walba, waxaan soo saarnaa tobanaan kun oo tan oo qashin adke ah, waxaana sii deynaa in ka badan 400,000 oo gaas kuleylka-ceshanaya ah oo keena qiiq iyo ceeryaamo isqabsada iyo diirimaad dunida oo dhan ah. Xajmigeena dartii, waxaan awood u leenahay inaan bedelno saameynta deegaanka ee magaaladeena.

Waa taas sababta aay Guriyeynta Beesha Toronto u leedahay “Qorshe Cagaaran” oo ah in lagu dhaqaaleeyo tamar iyo biyo, laguna yareeyo wasaqda. Waxaan:

- Bedelnay qaboojiyayaashii iyo cunto kariyaashii gaboobay ee aan waxtareyn
- Rakibnay musqulo biyo-yar la raacsho
- Gelinay in ka badan $100 malyan hagaajinada dhismaha
- Lamaane la sameynay kiraystayaasha iyo dadaalada kale ee “cagaaran” sida beeraha beesha

Hadda waxaan kala shaqeyneynaa kiraystaasha kordhinta meerteynta, sameynta meelo qashin oo ka nadiifsan, kana amaan badan, dhaqaaleynta biyaha, hagaajinta meelaha cagaarka ah.

Wasakhda khatarta leh

Adigaa mas’uul ka ah xooridda cirbadaha, rinjiga, kiimikooyinka wax lagu qaso iyo batariga. Kala hadal Shaqaalahaaga Dhismaha wixii fariimo ah.

Kululeynta iyo korontada

Dhismayaasha badankood, kululeynta iyo korontada waa qeyb ka mid ah kirada. Halka kululeynta iyo korontada aaysan ku jirin kirada, Iskuduwahaaga Adeegyada Kiraystaha ayaa kaa caawinaya inaad xirato xisaabtaada adeegyada korontada iyo biyaha.

Dhaqaaleynta tamarta

Gacan ayaad ka geysan kartaa in la yareeyo kharashyada adigoo raacaya talooyinka soo socda:

- Ha kululeyn dibadda kore! Haddii aqalkaaga uu jiilaalka aad kulul yahay, ha furin daaqadaha. Gaabi halka laga xukumo kuleylka (thermostat).
- Tamarta dhaqaalee kushiinka dhexdiisa. Dabool dheryaha cuntada lagu kariyo. Marna ha ka tegin cunto kariyaha oo shidan marka la isticmaalo ka dib, ama ha u isticmaalin foornada inaad ku kululeyso aqalka. Haka tegin albaabka qaboojiyaha oo furan, hana geyn heer-kulka qaboojiyaha meesha ugu sareeyso.
- Weydiiso dayactir. Tubada deyneysa biyaha waxay buuxin kartaa sixniga qubeyska hal maalin, waxayna keeni kartaa dhibaatooyin ah inuu fangas cagaaran ku dhasho. Dariishadaha jaban ama kuwa riixma oo xumaaday waxay keeni karaan in dabeyl ka soo gasho oo tamarta la khasaariyo.
- Yeelo dabeecadda “cagaaran”. Bakhtii nalalka marka aad qolka ka baxdo. Korontada geli bareesada la damin karo, oo bakhtii iyada oo dhan marka aadan isticmaaleyn. Yareey kuleylka ama qaboojiyaha hawada marka aad dibadda u baxeyso muddo dheer. Maalmaha xagaaga xir daahyada si kuleylka uusan u soo gelin, oo fur jiilaalka si aad ugu ogolaato qoraxda in aay soo gasho.

Ceymiska – badbaadi alaabtaada

Guriyeynta Beesha Toronto ma bixiso ceymiska alaabtaada.
Waxaan si xoogan kuugu dhiirigelineynaa inaad iibsato Xirmada Ceymiska Kiraystaha. Waxay:

- Kaa caawini kartaa inaad bedesho alaabta guriga, dharka, maacuunta iyo alaabtaada kale oo aay daadka, dabka ama xatooyada waxyeelada gaarsiiyeen
- Kaa bixin kartaa khasaaraha laga yaabo inaad adiga, qoyskaaga ama martidaada geysataan
- Dabooli kartaa shuruudaha ceymiska ee qabsashada qolalka dadka ka dhaxeeya ee xafladaha loogu talagalay

Kala xiriir shirkadaha ceymiska deegaanka sicirka iyo war tafatiran.

Haddii aad qaadatid kaalmada bulshada, Ontario Works iyo Barnaamijka Kabka Curyaanimada Ontario ayaa kaa bixin kara kharashyada bilwalba ilaa cadadka ugu badan ee gunnada hooyga. Kala hadal Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha si aad u ogaatid inaad xaq u leedahay.

Xayawaanka waxyeelada leh

Nasiib-xumo, baranbaro, jiir iyo xayawaan kale oo waxyeelo leh ayaa mararka qaar geli kara dhismayaasha. Waxay ugu xun yihiin meelaha aan nadiifka ahayn, isku-qasan, buuqa-badan ama aad u diiran. Gacan ka geyso ka hortagga martidan aan la dooneyn.

- Nadiifi aqalkaaga. Qashinka si ku haboon u tuur.
- U sheeg Shaqaalahaaga Dhismaha haddii aad aragtid baranbaro ama xayawaan waxyeelo leh. Haddii loo baahdo daaweyn, u raac fariimaha isu diyaarinta sida aay yihiin si loo helo natiijada ugu wanaagsan.
- Cunto ha siin qooleyda, tukulushka ama xayawaanka dibad-joogga ah. Tan waxay soo jiidan kartaa xayawaanka waxyeelada leh sida jiirka noocyadiisa kala duwan, dabacadeeyaha iyo raakuun.

Dhilqaha

Dhamaan Toronto iyo magaalooyin kale oo badan dhilqaha wuxuu noqday dhibaato. La dagaalankiisa wuxuu ku xiran yahay fal dhaqso ah oo dhameystiran.

- U gudbi isla markiiba wixii dhilqe ah Shaqaalahaaga Dhismaha ama wac 416-981-5500.
- Haddii loo baahan yahay daaweyn, u raac fariimaha sida aay yihiin. Haddii kale, daaweynta ma shaqeyn doonto.
- Ha tuurin joodariyada iyo alaabta guriga ee dhilqaha galay. Tan waxay sii fidineysaa dhibaatada oo kaliya. Bedelkeeda, weydii Shaqaalahaaga Dhismaha sida ugu amaanka fiican ee loo tuuro sheeyada dhilqaha galay.

Waxaad gacan ka geysan kartaa ka hortagga dhilqaha adigoo ka takhalusaya isku-qasnaanta si joogto ahna u marinaya dhulka makiinada qashinka nuugta.

Dayactirada

Dayactirada deg-degga ah

Wac 416-981-5500 wixii dayactir deg-deg ah – haddii aadan heysan kuleyl iyo koronto, ama aad soo gudbineyso biyo daadanaya, musqul buux dhaafday iyo daad.

EasyTrac – wuxuu ka caawiyaa shaqaalaha iyo kiraystayaasha in aay dabagalaan adeegyada laga codsaday, iyo sidoo kale su'aalahaaga. Codsi walba waxaa la siiyaa lambar EasyTrac ah, waxaana lagu diiwaangeliyaa database-keena. Madaxda-dhismayaasha, iyo shaqaalaha kale ee dhismaha iyo shaqaalaha Xarumaha Jawaabaha waxay fiirin karaan database-ka si aay u dabagalaan codsiyada oo dhan. Database-ka waxaa la cusbooneysiiyaa marka aad su'aal soo weydiiso, marka uu jiro war cusub ama marka shaqada la dhameeyo.

Dayactirada joogtada ah

Kala hadal Madaxaaga-dhismaha, wac 416-981-5500 ama buuxi oo saxiix Foomka Codsiga Adeega Kiraystaha dhamaan wixii dayactir joogto ah, sida:

- Qalabka guriga ee aan si haboon u shaqeyneynin
- Tubooyinka jaban ama nalalka
- Dhulalka, saqafka, albaabada ama dariishadaha wax gaareen

Waxaad ka heli kartaa Foomka Codsiga Adeegga Kiraystaha dhismahaaga. Foomka wuxuu kuu ogolaanayaa inaad shaqaalaha siiso ruqsad eey ku galaan aqalkaaga si aay u sameeyaan dayactir haddii aadan guriga joogin. Haddii aadan hubin waxa ka xun, sawirada yaala xafiiska Madaxa-dhismaha ayaa kaa caawini kara inaad sharaxdo dhibaatada.

Codsigaaga dayactirka waxaa la siin doonaa lambar EasyTrac ah. Lambarkan wuxuu idiin ogolaanayaa inaad dabagashaan codsigaaga adiga iyo shaqaalaha. Dayactirada joogtada ah waxaa lagu dhameyn doonaa shan maalmood oo shaqo. Haddii shaqada aay dheeraaneyso, waan kuu sheegi doonaa waana kuu sharixi doonaa.

Baraf qaadidda

Kiraystayaasha ku jira aqalada caadiga ah ama guryaha-taxan waa in aay barafka ka qaadaan meesha dadweynaha maraan ee guryahooda hortooda ah, iyo meesha aay ayaga maraan iyo jaranjarooyinka. Kiraystayaasha leh curyaanimada waxay kala xiriiri karaan 416-392-7768 Magaalada Toronto si loogu qabanqaabiyo baraf ka qaadidda.

Xanaaneynta beerta-guriga

Kiraystayaasha ku jira aqalada caadiga ah ama guryaha-taxan ayagaa mas’uul ka ah jaridda cowska, ururinta caleemaha, jaridda dhirta deyrka ku wareegsan iyo xanaaneynta beerta gurigooda. Ha iloobin inaad bacrimin ka dhigto caleemahaaga iyo wixii aad ka jartay dhirta – si aad u sameysato bacrimin lacag la’aan ah oo beertaada aad ku qurxiso. Ka wac Magaalada Toronto 416-338-2010 si aad u ogaato halka laga helo weelka bacriminta lagu sameeyo oo qiimo-jaban.

Dhismahaaga

Adeegyada beesha

Dhismayaasha qaar, hey'adaha degaanka ayaa ka bixiya fasalo afka Ingiriiska ah, barnaamijyo caruur, ama adeegyo kale oo loogu talagalay kiraystayaasha iyo dad aan kiraystayaal ahaynba. Dhismayaasha qaar waxay leeyihiin xafiisyo aay isticmaalaan dhakhtaro iyo dhakhtarada cagaha. Kiraystayaal badan ayaa isticmaala adeegyadan howl-fududeynta ah. Si aad wax dheeraad ah uga ogaatid, la hadal Shaqaalaha Dhismahaaga.

Qolalka dhardhaqidda

Dhismayaasha badankood waxay leeyihiin qolal dhardhaqid oo leh dhardhaqeyaal iyo qalajiyayaal ku shaqeeya qadaadiic. Saacadaha iyo sicirada waxay ku dhegan yihiin qolka dhardhaqidda.

Haddii aad aragtid dhardhaqe ama qalajiye jaban, ama makiinad ceshaneysa lacagtaada, wac (416) 869-0680. Haddii aad soo wacdo saacadaha shaqada ka dib, waxaa lagugu soo celin doonaa taleefanka maalinta shaqo ee ku xigta. Waxaa naga go'an inaan bixin dayactiro tayo fiican leh shan maalin oo shaqo gudahood.

Si aad u hesho dharka ugu nadiifsan – loogana ilaaliyo makiinadaha in aay jajabaan – ha buux-dhaafin makiinadaha ama ha ku darin biyo dheeraad ah. Dhardhaqayaasha halka hore dharka looga rido, waxay sida ugu nadiifsan kuugu dhaqayaan marka aad isticmaasho biyo qabow iyo saabuun ah kala-bar inta aad caadi ahaan isticmaasho.

Meesha baabuurta la dhigto

Beelaha badankood waxay leeyihiin meelo baabuurta la dhigto oo loogu talagalay kiraystayaasha iyo martida. Si aad u kiraysato meel aad baabuurka dhigato, la xiriir Shaqaalaha Dhismahaaga.

Dhamaan gawaarida la dhigo Guriyeynta Beesha Toronto waa in aay lahaadaan ruqso shaqeyneysa oo lagu dhigan karo gaariga. Haddii gaarigaaga uu yaalo hantida Guriyeynta Beesha Toronto dusheeda oo uusan shaqeyneynin ama uu leeyahay taargo dhacday, waxaa lagu jiidi doonaa kharashkaaga.

Qolalka la kireeyo

Dhismayaal badan oo Guriyeynta Beesha Toronto ah ayaa leh qolal madadaalo, qolal farshaxan, qolal shir iyo jiimam. Kuwo badan ayaa gawaarida curyaamiinta geli karaan.

Kiraystayaasha iyo kooxaha kiraystayaasha weey u qabsan karaan qolalkaan mid walba oo ka mid ah shirarka, xafladaha iyo dhacdooyinka kale. Waxba laguguma soo dalici doono haddii aad u qabsato qolalkan dhacdooyin u furan dhamaan kiraystayaasha, ama shirarka kiraystayaasha. Xafladaha gaarka ah lacag ayaa lagugu dalacayaa.

Si aad meel u qabsato ama u ogaato wax dheeraad oo ku saabsan nadaamka Isticmaalka Meelaha-banaan, la xiriir xafiiskaaga CHU-ga ama wac 416-981-5500. dhacdooyinka halka mar ah, meesha waa in la qabsadaa, oo la bixiyaa wixii lacag ah, laba todobaad dhacdada ka hor. Waxaad sidoo kale meel u qabsan kartaa barnaamijyo soconaya, sida barnaamij dugsiyada ka dib ah ama casho toddobaadle ah. Kiraystayaasha iyo martida waa in aay raacaan nadaamka Isticmaalka Meelaha-banaan.

Amaankaaga

Amaanka dabka

Amaanka dabka waa muhimadda ugu sareeysa. Shaqaalaha waxay tijaabiyaan dhamaan aaladaha dabka iyo amaanka, waxayna tijaabinayaan alaarmiga qaaca deyr walba.

Diyaar noqo inta uusan dabka ku helin. Aqri fariimaha dabka ee ku dhegan gudaha albaabka aqalkaaga. Ogoow bixitaanka ugu dhow, oo qorshee jidka labaad ee loo baxsado haddii bixitaankaas uu xirmo. Haddii aad leedahay curyaanimo ama ogtahay inaad u baahnaan doonto kaalmo si aad uga baxdo dhismaha, la hadal Shaqaalahaaga Dhismaha.

Haddii aad ka shakiso dab, yeeri alaarmiga kuugu dhow oo wac 911.

Qaaca iyo Qalabka Sheega Kaarboon Moono-oksaaydh (CO)

Aqalkaaga wuxuu leeyahay alaarmi koronto ama batari ku shaqeeya. Si joogto ah u fiiri inuu shaqeynayo. Haddii aad leedahay aaladda sheegta CO, weydii Shaqaalahaaga Dhismaha si uu kuugu sharaxo sida loo dayactiro.

Haddii alaarmigaaga qaaca uu dhawaaqo oo aad hubto inuusan JIRIN DAB.

- Fur dariishadahaaga.
- Babi qaaca.
- Albaabka aqalkaaga ha xirnaado si qaaca uusan u gaarin meesha guryaha dhexdooda ah.

Haddii alaarmiga CO uu dhawaaqo, wac 911.

Weligaa ha yareysan alaarmi dab, alaarmiyo CO ama albaabada iskood u xirma. Haddii aay ku dhibayaan, la hadal Shaqaalaha Dhismahaaga.

Amaanka beesha

Dhismayaasha ugu amaanka badan waa halka dadka aay yaqaanaan deriskooda, ka qeybgalaan dhaqdhaqaaqyada bulshada kana wada shaqeeyaan wanaagga beeshooda.

Dhismayaal badan waxay leeyihiin guddiyo amaanka kiraystaha oo ka caawiya xalinta dhibaatooyinka nabadgelyada. Kiraystayaasha waxay gacan ka geysteen in laga dhigo xaafadahooda kuwo ka amaan fiican iyagoo maraya Neighbourhood Watch, Vertical Watch iyo Kormeer Amaan (Safety Audits). Ku biir koox dhismahaada ka jirta, ama si aad u bilowdo mid, la hadal Wakiilkaaga Kiraystaha, Sarkaalka Horumarinta Caafimaadka ama La-taliyaha Amaanka Beesha.

Qeybtaada ayaad ka qaadan kartaa ilaalinta amaanka.

- Mar walba albaabka aqalkaaga ha xirnaado.
- Albaabka wax ha ku tiirin si uu furnaado.
- Si loo hubiyo amaanka ilmahaaga, fadlan ha ka qaadin dariishada waxa joojiya (birta ka celineysa dariishadda in aay wada furanto).
- Ha la raacin wiish qof aadan aqoon. Sug qof aad garato inuu kula raaco. Istaag meesha laga xukumo meel u dhow.
- Ha u ogolaan guriga in aay kuu soo galaan dad aadan garaneyn. Haddii uu qof ku yiraahdo wuxuu ka socdaa Guriyeynta Beesha Toronto, weydii inaad aragto aqoonsigooda.

- Marka qof uu kaa soo garaaco gelitaanka hoose, ka fiiri qofka inta aadan ka furin kanaanlka amaanka ee TV-ga, waa haddii dhismahaada uu leeyahay.
- Haddii aad ka welwelsan tahay sababta uu qof u joogo dhismahaada, u sheeg shaqaalahaaga dhismaha ama wac 416-981-5500.

Amaanka shaqsiga

Dhismayaasha badankood kiraystayaasha waxay leeyihiin “hab saaxiib” oo aay iskula socdaan. Hey’adaha qaar waxay leeyihiin “hab saaxiib taleefan” ah oo aad ku biiri karto.

Wixii war dheeraad ah, la hadal Wakiilkaaga Kiraystaha, La-taliye Amaanka Beesha ama Sarkaalka Amaanka Beesha.

Sheegidda dambiyada

Wac 911 haddii aad u maleyso in dambi uu ka dhacayo dhismahaada, ama qof uu khatar ku jiro.

U sheeg booliiska haddii aad dooneyso inaan lagu shaacin. Waxaad kaloo wici kartaa Crime Stoppers 222-TIPS haddii aad dooneyso inaad soo sheegto dambi laguna shaacin. Crime Stoppers ma isticmaalaan taleefanada lambarka laga arko.

U sheeg Shaqaalaha Dhismaha ama La-taliyayaasha Amaanka Beesha waxa aad qabto si aay u dabagalaan.

Ka wada shaqeynta amaanka

Waxaad kala shaqeyn kartaa shaqaalaha, lamaanayaasha beesha iyo booliiska si looga dhigo dhismahaaga mid ka amaan badan. Guriyeynta Beesha Toronto, boqolaal kirayste ayaa:

- • Sameeyey kormeer amaanka ah
- • Aasaasay Guddiyo Amaanka iyo Nabagelyada ah
- • Gacan ka geystay qorsheynta amaanka beesha

Ku howlanaanta

Kirayste walba wuxuu ka tirsan yahay beesha Guriyeynta Beesha Toronto. Marka aad kala shaqeyso kiraystayaasha kale iyo shaqaalaha, waxaad gacan ka geysaneysaa inaad ka dhigto beesha meel saaxiibtinimo leh oo amaan ah oo lagu noolaado. Waxaad kaloo cod ku leedahay go'aanada ku saameeya.

- **Ka-qeybgal Doorashooyinka Kiraystaha.** Dhisme walba wuxuu leeyahay Wakiil Kirayste, oo la doortay muddo sedex-sanno ah. Dhamaan kiraystayaasha da'dooda gaareyso 16 iyo ka weyn weey codeyn karaan waana is sharixi karaan.

- **La hadal Wakiilkaaga Kiraystaha.** Wakiilkaaga Kiraystaha waa qeyb ka mid ah Golaha CHU-ga oo ka hadla arrimaha saameeya dhamaan kiraystayaasha. Waxaad la socodsiin kartaa Wakiilada Kiraystaha arrimaha muhiimka kuu ah, ama waxaad kala shaqeyn kartaan in aay ka bilaabaan dhaqdhaqaaq beeshaada.

- **La hadal Sarkaalkaaga Horumarinta Caafimaadka (HPO)** si aad u ogaato wax dheeraad ah oo ku saabsan shirarka, dhaqdhaqaaqyada ama kooxaha dhismahaada ka jira, ama si aad u soo jeediso talooyin cusub. HPO-yada waxay kaloo kaa kaalmeyn karaan inaad qabanqaabiso shirar ama dhaqdhaqaaqyo.

- **Kala soco looxa wararka ee dhismahaaga** ogeysiisyada iyo qoraalada laga sameeyey shirarka. Waxaad sidoo kale u tagi kartaa shirarka Golaha CHU iyo Guddoonka maamulayaasha goobjooge ahaan.

- **Soo jeedi talooyin cusub.** Qaar badan oo ka mid ah barnaamijyada iyo dhaqdhaqaaqyada ugu wanaagsan, iyo xalalka dhibaatooyina ee shaqeeya ee ugu wanaagsan badankood, waxay ka yimaadaan kiraystayaasha. Haddii aad heysid talo, u sheeg Wakiilkaaga Kiraystaha ama Sarkaalka Horumarinta Caafimaadka.

Sida uu u shaqeeyo Habka Ka-qeybgalka Kiraystaha

Habka Ka-qeybgalka Kiraystaha waxaa sameeyey kiraystayaasha iyo shaqaalaha si loo hubiyo kiraystayaasha in aay cod ku yeeshaan heer walba, ka soo biloow dhismahooda ilaa Guddoonka Maamulayaasha.

Dhisme walba

Wakiilka Kiraystaha waxaa doorta kiraystayaasha muddo seddex-sanno xilli ah. Wakiilka Kiraystaha:

- Wuxuu matalaa dhamaan kiraystayaasha dhismaha iyo guryaha-taxan
- Wuxuu la shaqeeyaa kooxaha kiraystayaasha iyo shaqaalaha
- Wuxuu la socodsiiyaa Golaha CHU-ga arrimaha
- Waa inuu u soo gudbiyo kiraystayaasha wixii ku saabsan arrimaha CHU-yada
- Wuxuu u olo-oleeyaa welwelka kiraystayaasha aay la qabaan kiraystayaasha kale iyo lamaanayaasha beesha kale
- Raacaa nadaamyada Guriyeynta Beesha Toronto

Wakiilada Kiraystaha shaqaalaha kama tirsana. Wax kama qabtaan xaaladaha deg-degga ah ee dhismaha, ama ma heystaan furayaasha aqalada ama xafiisyada. Kuma shaqo laha guri-ka-saaridda ama doodda ku saabsan kiradaada.

CHU-walba

Golaha CHU-ga wuxuu u kulmaa si joogto ah si uu u wadaago warka gacana looga geysto xalinta dhibaatooyinka saameeya kiraystayaasha CHU-ga. Golaha CHU-yada wuxuu ka kooban yahay Wakiilo Kirayste. Golayaasha CHU-yada waxay kala shaqeeyaan kiraystayaasha, shaqaalaha iyo hey'adaha beesha si loo sameeyo Qorshe Maamul Beel. Tan macnaheedu waa in kiraystayaasha aay cod ku leeyihiin barnaamijyada, adeegyada iyo miisaaniyadda CHU-gooda.

Guddoonka Maamulayaasha Guriyeynta Beesha Toronto

Kiraystayaasha waxay doortaan laba wakiil oo ka mid ah 12ka xubnood ee Guddoonka Maamulayaasha. Xubnaha kale ee Guddoonka waa afar xubin oo Golaha Magaalada ah iyo shan xubin oo shacbi ah. Guddoonka wuxuu ka gaaraa go'aan nadaamyada saameeya howlfulinta Guriyeynta Beesha Toronto.

Qorsheynta ka-qeybgalka leh

Kiraystayaasha waxay heystaan fursado badan oo aay gacan kaga geysanayaan qorsheynta mustaqbalka beeshooda.

• Qorshaha Maamulka Beesha waa qorshe wax qabad oo seddex-sanno ah oo loogu talagalay Guriyeynta Beesha Toronto. Wuxuu ku saleysan yahay wadatashi lala yeeshay dhamaan CHU-yada, iyo iyadoo fursad tala-dhiibasho la siiyey kiraystayaasha iyo wakiilada beelaha ee daneynaya.

• Golayaasha CHU-yada waxay talo ka dhiibtaan Qorshayaasha Howlaha CHU-ga ee sameeya muhimadaha iyo miisaaniyadda.

• Sannad walba, kiraystayaasha ka socda dhamaan Guriyeynta Beesha Toronto ayaa go'aamiya sida loo isticmaalayo qeyb ka mid ah miisaaniyadda loogu talagalay kharashyada waaweyn ee hagaajinta dhismayaasha ee aay kiraystayaasha tilmaameen.

Hormarinta Dhaqaalaha Beesha

Guriyeynta Beesha Toronto waxaa ka go'an in la helo habab loogu dhiso fursado dhaqaale naftaada iyo deriskaada. CHU-yada qaar waxay ka caawiyeen ardayda in aay helaan shaqooyinka xagaaga, kuwo kalena waxay la lamaanoobeen ganacsiyada beesha si aay u siiyaan fursado kiraystayaasha.

La hadal Maamulahaada Guriyeynta Beesha si aad u ogaato wax dheeraad ah.

Maalgelinta dhalinyaradeena

Guriyeynta Beesha Toronto waxay maalgelin ku sameyneysaa caruurteena iyo dhalinyaradeena iyadoo u siineysa:

• Tababar hogaamineed

• Deeqo-waxbarasho

• Carwooyin shaqooyinka xagaaga ah

• barnaamijyo shaqo iyo tababar dhalinyaro

Dhalinyarada waxay ku howlanaayeen golaha dhalinyarada, a'zine, barnaamij raadiyo, sawirqaadid, barnaamijyo farshaxan kale iyo Shabakadda Barashada Cadaaladda Ontario.

Hagaajinta Dhismayaasha

Sannad walba, Guriyeynta Beesha Toronto waxay lacag gelisaa in aay ka dhigto dhismayaasheena kuwo deegaan ahaan ku fiican iyo in aay dayactirto dhismayaasha sida ugu badan u baahan. Waxaa ku jira tan ku bedelidda nalalka duqoobay kuwo dhaqaaleeya tamarta, hagaajinta meelaha qashinka lagu qubo iyo meelaha lagu meerteeyo, iyo ka dhigidda qolalka dhar-dhaqidda kuwo isticmaal fudud.

Barnaamij dib-u-qalabeyn aqalka dhexdiisa ah ayaa bilaabanaya 2007. Qeyb ka mid ah barnaamijkan ahaan musqulaha iyo kushiinada aqalada qaarkood ayaa la hagaajin doonaa.

Xisaabta Maalgelinta Bulshada

Sannad walba, Guriyeynta Beesha Toronto waxay meel u dhigtay $1 malyan barnaamijyada degaanka ee gacan ka geysta dhisidda beelo xoog leh. Golayaasha CHU-yada, iyo kooxaha kale ee kiraystayaasha, iyo kooxaha aan faa'iido-doonka-ahayn ee la shaqeeya kiraystayaasha ayaa dalban kara deeq-lacageed oo mashruuc loogu talagalay.

Weydiiso Sarkaalkaaga Horumarinta Beesha warka oo tafatiran.

Lacagaha Golayaasha CHU-yada

Lacagta Golaha CHU-ga waa qeyb ka mid ah qorshaha hab ka-qeybgal oo waxqabad leh. Lacagaha Golaha waxay ka taageeraan Golayaasha Kiraystaha iyo kooxaha kiraystayaasha, si aay ugu howlanaadaan go'aan gaaridda beeleed.

Weydiiso Sarkaalkaaga Horumarinta Beesha warka oo tafatiran.

Xuquuqdaada iyo Waajibaadyadaada

Halkan waa gurigaaga. Waxaad ku noolaan kartaa halkan inta aad rabto, haddii aad ka soo baxdo waajibaadyadaada lagu sameeyey Xeerka Deganaanshaha Guryaha (Residential Tenancies Act).

Waa waajibkaaga in aad:

- Kirada ku bixiso waqtigeeda bil walba
- Aqalka aad nadiifiso
- Soo sheegto dhibaatooyinka dayactirka iyo dib-u-dhiska
- Dayactirto ama aad bixiso khasaaraha aad ka geysato:
- Aqalka dhexdiisa ama meelaha dadka ka dhaxeeya
- Si kama' ama ku talagal ah
- Aad adiga, reerkaaga, xayawaankaaga ama qof walba oo aad ku casuunto dhismahaada
- Sii ogeysiis 60 maalmood ah haddii aad qorsheyneyso inaad ka baxdo aqalka
- Soo sheeg isbedelada dakhligaaga ama tirada reerkaaga ka kooban yahay

Mulkiilahaada ahaan, Guriyeynta Beesha Toronto waxay leedahay waajibaadyo muhiim ah.

Waa in aan:

• Bixinaa adeegyada muhiimka ah – shidaal, koronto, gaas iyo biyo kulul iyo kuwo qabow
• Dhismaha dayactir fiican u sameynaa
• Ka soo baxnaa xeer-hoosaadyada caafimaadka, amaanka iyo heerarka hantida ee deegaanka
• Ku siinaa cadeyn (receipt) wixii lacag ah ee aad bixiso, haddii aad weydiisato mid

Guri-ka-saaridda

Guriyeynta Beesha Toronto ma dooneyso in aay guriga kaa saarto. Waxaan rabnaa inaan dhibaatada waqti hore ka wada shaqeyno si aad gurigaaga u heysato. Fadlan la xiriir Isku-duwahaada Adeegyada Kiraystaha haddii aadan bixin karin kiradaada, ama haddii aad la kulanto dhibaatooyin kale.

Laakiin, guriga waa lagaa saari karaa haddii:

- Aad la daahdo kiradaada marar badan
- Aad been ka sheegto dakhliga reerkaaga
- Aadan u qalmin guriyeyn RGI oo aad bixin weysid kirada suuqa
- Aad buuq sameyso ama u dhaqanto hab si xoog leh u dhibey kiraystayaasha kale ama mulkiilaha
- Aad heysato xayawaan dhaawac qof u geystay, oo sameeya dhib aan macquul ahayn, ama u keena kirayste kale inuu xasaasiyad khatar ah yeesho, oo aadan dhibaatada wax uga qaban sida shaqaalaha, iyagoo u dhaqmaya si macquul ah, aay kuu weydiistaan inaad wax uga qabato

- Aad khalkhal geliso amaanka kirayste kale
- Aad aqalka ku heysato dad ka badan inta aay ogol yihiin xeer-hoosaadyada caafimaadka iyo amaanka deegaanka ama heerarka guriyeynta
- Aad sharciga jebiso ama aad dhismaha gudahiisa ama hantida Guriyeynta Beesha Toronto dusheeda meel ka mid ah ku sameyso ganacsi sharci-darro ah

Fadlan la hadal Isku-duwahaaga Adeegyada Kiraystaha haddii aad u baahan tahay war dheeraad ah oo ku saabsan guri-ka-saaridda.

Waxa laga filayo shaqaalaha

Guriyeynta Beesha Toronto waxay leedahay Xeer Anshax oo loogu talagalay shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha maamula hantida oo dhan. Shaqaalaha:

- Kama qaadan karaan baqshiis, lacag ama haddiyad kiraystayaasha
- Kama gadi karaan adeegyada ama sheeyada kiraystayaasha
- Kama iibsan karaan hanti kiraystayaasha ama qoysaskooda
- Kama qaadan karaan lacag loogu talagalay adeegyada kiraystayaasha
- Kagama bedelan karaan adeegyada hanti kiraystayaasha
- Kama isticmaali karaan ama kama qaadan karaan hantida kiraystaha, xitaa haddii looga dhex tagay dhismaha
- Kama deynsan karaan lacag ama wax aay leeyihiin kiraystayaasha
- Ugama noqon karaan marqaati dardaaran (will), dhaar ama hadal lagu dhaarto kiraystaha (marka laga reebo qaraabo), ama ma noqon karaan fuliyaha dardaaranka kiraystaha
- Ma joogi karaan shaqada iyaga oo aay saameyn ku leedahay aalkolo ama daroogo sharci darro ah
- Sinaba uma xumeyn karaan kiraystayaasha
- Ma takoori karaan ama khashkhashaadi karaan kiraystayaasha sideey doonto ha noqoto

Haddii aad dareentid shaqaalaha in aay jabiyeen xeerkan, fadlan u gudbi dhacdada Maamulaha CHU-ga.

Cabashada laga sameeyo shaqaalaha

Guriyeynta Beesha Toronto waxay leedahay nadaam cabasho oo loogu talagalay cabashada kiraystayaasha ka sameeyaan shaqaalaha.

Haddii aadan ku qanacsaneyn adeegyada shaqaalaha, ama maamulayaasha iyo shaqaalaha qandaraaslayaasha ah, la hadal Maamulaha CHU-ga.

Maamulaha CHU-ga ayaa diiwaangelin doona cabashadaada oo isku dayi doona in la xaliyo 10 maalin oo shaqo gudahooda. Haddii aadan weli qanacsaneyn, wac 416-981-5500. Cabashadaada waa la diiwaan gelin doonaa. Maamule sare ayaa kula soo xiriiri doona shan maalin shaqo gudahood. (Haddii aad qabto cabasho si toos ah uga dhan ah Maamulaha CHU-ga, wac 416-981-5500 si aad u bilaawdo habka aad raaceyso.)

Xuquuqda aadanaha

Guriyeynta Beesha Toronto waa beel lagu wada jiro oo qof walba si cadaalad ah ula dhaqanta. Waxaan dhowrnaa Xeerka Xuquuqda Aadanaha Ontario, iyo dhamaan nadaamyada magaalada iyo gobolka.

Waxaan kaloo leenahay Nadaamkeena Xuquuqda Aadanaha, Khashkhashaadda iyo Helitaanka Cadaaladda ah oo khuseeya Guddoonka Maamulayaasha, iyo dhamaan shaqaalaha, qandaraaslayaasha, kiraystayaasha, iskaa-wax-u-qabsada dadka ku shaqeeya, iyo xubnaha guddiyada ee la magacaabay.

Qofka waxaa loola dhaqmi doonaa takoorid iyo khashkhashaad la'aan. Khashkhashaad waxaa soo geli kara faallooyin ama xifaaleyn xadgudub ah ama la dhibsado, hanjabid, fal caay ah, faafinta xan been ah, qeybinta sawiro-qaawanaan ah, u hanjabidda in "dibadda loo saaro" geeyiska iyo lesbiyaanka, diidmada la shaqeynta dadka ka socda qolo gaar ah, taabasho la dhibsado, jug jir ama jinsiyeed.

Qof walba waxaa lagu dhiirigelinayaa in marka hore uu isku dayo inuu dhibaatada toos u xaliyo. Haddii taas aaysan suuragal ahayn, laga yaabee inaad u gudbiso cabasho qoraal ah Maamulaha CHU-ga. Haddii aad cabasho ka qabto Maamulahaaga CHU-ga, wac 416-981-5500. Horjooge sare ayaa taleefanka kugu soo celin doona hal maalin shaqo gudahood.

Waxa-shaqsiga-u-gaarka ah

Waxaad xaq u leedahay in gurigaaga uu gaar kuu noqdo. Shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha waxay gali doonaan oo kaliya haddii:

- Aan ku siino ogeysiis 24 saac ah; ama
- Aay jirto xaalad deg-deg ah sida dab ama daad, ama shaqaalaha aay rumeysan yihiin in kiraystaha uu dhaawacan yahay ama jiran yahay ama kaalmo u baahan yahay.
- Aad joogto guriga, albaabka furto oo aad siiso shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha ogolaasho aay ku galaan.

Deris wanaagga

Sigaar-cabidda

Kiraystayaasha, martida iyo shaqaalaha sigaar kuma cabi karaan meelaha dadka ka dhaxeeya, oo aay ku jiraan guryaha meelah u dhaxeeya, meelaha laga soo galo guriga, xafiisyada iyo qolalka dadka ka dhaxeeya. Waad ku cabi kartaa aqalkaaga dhexdiisa. Haddii aad ku cabeyso sigaar baalkoonkaaga, hubi inuusan dhibeynin deriskaaga qaaca sigaarka ee kaa soo baxaya.

Xayawaanka-guriga-lagu-heysto

Adigaa mas'uul ka ah xayawaanka aad guriga ku heysato. Waa inaad ka daba nadiifisaa, dayactirtaa wixii khasaaro ah ee eey geeystaan, oo aad hubisaa in aaysan khatar gelin ama dhibin kiraystayaasha kale iyo shaqaalaha.

Guriyeynta Beesha Toronto weey xaddidi kartaa tirada xayawaanada aqalka lagu heysto. Laguuma ogola xayawaan sharci darro ah inaad aqalka ku heysato.

Ka cabashada deriska

Kiraystayaasha waa in aay isku dayaan in aay xurguftooda xaliyaan. Haddii tan aaysan suuragal ahayn, waxaad sameyn kartaa cabasho qoraal ah. Kala xiriir xafiiska CHU-ga warka oo tafatiran.

U wareejinta aqal kale

Waxaa laga yaabaa inaad waqti walba dalban karto in laguu wareejiyo aqal kale ee Guriyeynta Beesha Toronto ah meeshuu rabo ha ku yaalee. Laakiin, liiska sugitaanka meelaha badankood aad buu u dheer yahay – badanaa dhowr sanno ayaa la sugaa. Si aad u dalbato, la hadal Xafiiskaaga CHU-ga. Shaqaalaha ayaa kuu sharixi doona habka dalbashada. Liiska sugitaanka guud ahaan “sida loo kala horeeyo, ayaa loo kala hormariyaa.” Laakiin, xaalado gaar ah marka aay jiraan, dadka qaar oo leh baahi deg-deg ah laga yaabee in dhaqso loo raro.

Marka lagu wareejiyo, waa in aan lacag lagugu lahayn ama aadan dacwo sharci ah kula jirin Guriyeynta Beesha Toronto. Aqalkaagana waa inuu gudbaa baaritaanaka inuusan meelna ka xumeyn.

Dhamaan waan in wada geli karaa

Laga soo bilaabo 1997 ilaa hadda Guddiga Naafatakoor-diika wuxuu ka shaqeeyey qaadidda caqabadaha – hindisaha dhismaha, nadaamyada iyo fikradaha – ee kiraystayaasha curyaanimada leh.

Guriyeynta Beesha Toronto waxay:

- Baaritaan ku sameysay dhismayaasha oo dhan si aay u ogaato halka gelitaan looga baahan yahay
- Kala shaqeysay waayeelka iyo Guddiga Naafatakoor-diidka si loo sameeyo Nadaamka Helitaanka Gelitaanka ee kiraystayaasha. Nadaamkan wuxuu ku jiraa website-ka Guriyeynta Beesha Toronto.

Wixii war dheeraad, kala hadal Shaqaalahaaga Dhismaha.

Beelo lagu wada jiro

Guriyeynta Beesha Toronto waxay ku faaneysaa kala duwanaanta beelaheeda.

Waxaan rabnaa inaan hubino in qof walba – meesheey doonaan ha ka yimaadaan ama afkeey doonaan ha ku hadlaan – uu si buuxda uga qeybgeli karo. Waxaan:

- U turjumnaa ogeysiisyada, jaraaiddada iyo fariimaha kale ee muhiimka ah afafka furayaasha ah ee looga hadlo beel walba
- Siinaa turjumaano afka ah iyo xanaano caruur shirarka kiraystayaasha
- Leenahay Nadaam Xuquuq Aadane, Khashkhashaad iyo Helitaan Cadaalad leh.

Guuridda

Inta aadan guurin ka hor bixi ogeysiis qoraal ah oo 60 maalmood ah. Ogeysiiskan waxaa la bixin karaa kowda bisha. Haddii aad u guureyso meel xanaano, shaqaalaha weey aqbali karaan ogeysiis ka yar laba bilood.

Kormeerka aqalkaaga

Markaad bixiso ogeysiiska ka dib, adiga iyo Shaqaalaha Dhismaha waxaad kormeereysaan aqalkaaga.

- Waxaad aqalkaaga ku celin kartaa xaaladdiisii asalka ahayd. (Tusaale, waad ka fujin kartaa warqadda gidaarka ee aad ku dhejiso.)
- Waxaad kaloo bixin kartaa dayactiridda khasaare xooggan ee aad geysatay ama nadiifinta aqal xoog u wasaqeysan.

Tusidda aqalkaaga

Markii aad bixisid ogeysiiska, Shaqaalaha Dhismaha waxay tusi karaan aqalkaaga saacado maalintii ah oo ku haboon, dadka doonaya in aay u soo guuraan.

Wiishka

Fadlan u sheeg Shaqaalaha Dhismaha maalinta iyo waqtiga aad guureyso si aay kuugu sii qabtaan wiishka.

Furayaasha

Fadlan u soo celi dhamaan furayaasha iyo fob-yada Isku-duwaha Adeegyada Kiraystaha.

Booqo web site-ka Guriyeynta Beesha Toronto:

- Wararka iyo dhacdooyinka
- Nadaamyada kiraystaha
- Qorshooyinka Maamulka Beesha
- Taariikhaha Unugga Guriyeynta Beesha Toronto
- Xayeysiiska shaqooyinka

www.torontohousing.ca
416-981-5500